



Orientation to Ontario

SHARCIYADA IYO XEERARKA XASHIISKA EE CANADA

Waa sharci inaad xashiiska isticmaasho gudaha Canada. Dawlada Canada ayaa leh xeerar loo dejiyay ilaalinta badqabka dadka marka ay iibsanaan ayna isticmaalayaan xashiiska baashaalka.

Waa inaad jirtaa 19 sano ama ka wayn tahay si aad u iibsato, u isticmaasho, u haysato aadna u beerato xashiishka baashaalka waxaadna haysan kartaa ugu badnaan 30 garaam oo xashiiska qalalan ah (ama wax u dhigma) marka aad joogto goobaha bulshada xili gaar ah kuwaasooaad oonlaynka uga iibsan karto Dukaanka Xashiiska ee Ontario (OCS) ama dukaan ruqsad ka haysta Gudiga Ciyaaraha ee Ontario (AGCO). Waxaad sigaar ahaan iyo shiishad ahaanba u isticmaali kartaa xashiishka markasta oo la ogol yahay isticmaalka tubaakada. Waa sharci daro inaad xashiis soo geliso xuduudaha caalamiga ah ee Canada. Magaallada aad dagan tahay ayaa lahaan karta xeerar hoose oo maamulaaya isticmaalka xashiishka gudaha magaalada. Si aad u hesho xog dheeraad ah booqo canada.ca

Geedaha xashiiska iyo maadooyinka

Xashiishka ayaa ka yimaada geedka Cannabis sativa wuxuuna leeyahay qaabab badan oo loogu dhuuqo shiishada.

Geedka Cannabis ayaa ka kooban sal, calemo, iyo baar. Xashiiska ayaa leh magacyo kale oo badan ayna ku jiraan marijuana, xashiish, haash, iyo shiishad taasoo badanaa laga wado baarka iyo maadooyinka laga sameeyay baarka.

Waxaa jira noocyo kala duwan ee geedka xashiiska ayna ku jiraan Indica, Ruderalis, iyo Hybrids, kuwaasoo loo iibsho inay leeyihiin marqaan. Xashiishka waxaa ku jira in badan 100 maadooyinka kiimikada ah oo loo yaqaano cannabinoids kuwaasoo ku milma istiinka aadanaha (endocannabinoid) si ay u abuuraan saamaynada balaran ee maskaxda. Labada maado ee ugu caansan ee ku jira xashiiska waa:

- **CBD (cannabidiol):** oo caan ku ah maadooyinka xanuun baa'iyaha, qajiyaaasha, iyo kahortaga walwalka ayagoo aan abuurin wax saamayno sun ah.
- **THC (delta-9 tetrahydrocannabinol amad-9-THC):** caan ku ah saamaynada sarqaanka badan (waxay ku siinaysaa "marqaan badan") loona adeegsado daawooyinka baxnaaninta qaarkood.

Waxaa jira afar nooc oo aasaasi u ah isticmaalka xashiishka:

- **San a dhuuqida:** Waa qaabka ugu badan ee dadku u isticmaalaan xashiiska. Waxaa ku jira ku dhuuqista tuubada gacanta lagu qabto, xaashi, shiishad, isku dar, ama afuuf.
- **Af ka qaadashada:** Xashiishka (oo badanaa tuman) ayaa carabka la hoos gashaa ama lagu buufiya afka kadibna la muudsadaa.

1-855-626-0002
<https://orientationontario.ca>



Sharciga Xashiiska

U adeegsiga xashiiska ujeedooyin baashaal ayaa sharci ka noqotay Canada Oktoobar 17, 2018. Sharciga Xashiiska ayaa abuuraaya nidaamka xadiga sharciga ee maaraynta soo saarida, qaybinta, iibinta, iyo haysashada xashiishka dhammaan Canada. Si aad u hesho xog dheeri ah booqo <https://laws-lois.justice.gc.ca/eng/acts/C-24.5>

Funded by / Financé par :

- **Cabista cabitaan ahaan:** U cabista xashiiska sida cunto ama cabitaan. Cabitaankaan ama cuntada waxaa ku jira maadooyinka shaqaynaaya ee cannabinoids.
- **Jirka la marsado:** Maadooyinka xashiishka ayaa la mariyaa kadibna mu milma maqaarka kore ayadoo la adegsanaayo saliid culus oo ay ku jiraan maadooyinka cannabinoids.

Si aad u hesho xog dheeraad ah, akhri Xaashida Xogta ee Cabirada Xashiiska ee Ururka Caafimaadka Dadwaynaha ee Canada

cpha.ca/sites/default/files/uploads/resources/cannabis/cannabasics-2018-fact-sheets-e.pdf

Gaari wadista iyo xashiishka

Marna ha wadin gaari adoo isticmaalaaya xashiish, Wadista gaari adoo ay ku naafaysay xashiis waa arin sharci daro ah oo khatar badan. Tan waxaa ku jira gaariyaasha, taraagyada, doomaha, gaariyaasha barafka, iyo gaariyaasha meelaha wadada ka baxsan maraaya.

Ontario waxay leedahay sharciga aan marna aqbalayn khalad. Si lamid ah khamriga, laguuma ogola inaad isticmaasho xashiis (sida lagu ogaan karo aalada baaritaanka daroogada ee federaalku ogoaday) haddii aad gaari wadayso.

Booliisku waxay haystaa qalab iyo baaritaanno ay ku ogaanayaan darawallada sarqaansan, ayna ku jiraan qalabka geeska wadada ee baaritaanka sameeya iyo baaritaannada maskax fiyoobida qofka. Haddii sarkaal booliis ah uu ogaado inaad xashiish cabsan tahay (ama daroogo ama khamri kale) waxaad waajihi doonaa ganaaxyo xun, ayna ku jiraan:

- hakinta rugsadaada
- ganaaxyo lacageed
- la wareegida gaariga
- diiwaanka danbiyada
- muddo xabsi lagugu xumaayo
- luminta aqoonsiga aad ku joogto Canada

Dadka danbiga gala markale ayaa waajaha ciqaabo adag iyo ganaaxyo daran sida waxbarasho qasab ah iyo inuu qofku ku biiro barnaamij daawayn ah. Si aad xog badan u ogooto booqo ontario.ca/page/cannabis-and-driving

MA OTAHAY?

Shaqsiyaadka jebiya sharciga ayaa waajihi kara xukunno danbi sida uu qabo Sharciga Xashiiska ee Federaalka. Sidaas awgeed, dadka daganaanshaha rasmiga ah haysta ayaa lumin kara daganaanshaha, halka dadka daganaanshaha ku meel gaarka ah haysta laga canada.ca

